## SOO-JEEDIN WAX KA BEDDELID: Waxa lagu sameeyo Waraaqahan Maxkamadda

WAA TIXRAAC KALIYA

Halkan waxa ku yaalla dhawr talo oo ku saabsan sida loo buuxiyo waraaqaha:

- Markasta isticmaal magacyadaada sharci oo buuxa, ma aha naaneysyo.
- Teebgaree ama ku qor xuruuf kala go'an oo nidaamsan. Nuqullo la buuxin karo oo waraaqaha ah waxa laga heli internetka barta ah: http://courts.maine.gov/fees_forms/forms.
- Waxa ad waraaq kasta ka xereyn doontaa Maxkamadda. Kahor inta aanad taas sameyn, ugu yaraan ka sameyso laba nuqul ama koobi waraaqaha ad buuxisay—mid ad ugu talogashay naftaada iyo mid ad ugu talogashay dhinaca kale ama qofka kale. Waxad u baahan doontaa meel ad ka sameysatid koobiyo (sida laybareeri). Karaaniga maxkamaddu kuuma sameyn karo koobiyo.
- Haddii mid ka mid ah ilmaha ku jira kiiskan qaato (ama qaatay) AFDC, TANF ama Medicaid, koobi dheeraad ah ka sameyso waraaqahaaga maxkamadda oo boostada ugu dir Wasaaradda Adeegyada Bini'aadanka. Adreesku wuxu yaallaa waraaqda dacwadda. Sidoo kale waa inad tan sameysid haddii ad DHHS weydiisatay inay kuu soo ururiso taageerada ilmaha.

### TALLAABADA KOOBAAD: Buuxi Waraaqaha

**<u>Soo-jeedin wax ka beddelid</u>**

Qaybta ugu sareysa waraaqdan waxa la yidhaahdaa "madaxa waraaqda." Fiiri madaxa waraaqda ee Amarka Maxkamadda ee asal ah oo ka qoro goobta maxkamadda, lambarka galka maxkamadda iyo magaca Dacweeyaha iyo Eedaysanaha. (Macluumaadkani isma beddelayo. Haddii ad markii hore ahayd Eedaysane, waxad wali tahay Eedaysanaha, xiitaa haddii ad tahay qofka xereysanaya Soo-jeedinta hadda.) Haddii aanad heli karin amarkii asal ah, waxad nuqul ama koobi ka heli kartaa karaaniga. Haddii ad isku dayaysid inad beddeshid qaddarka **kaliya** taageerada ilmaha, calaamadee sanduuqa ay ku qoran tahay "Kaliya Taageero Ilmo" ee hoos timaada ereyada "Soo-jeedin wax ka beddelid." Buuxi boggaga 1 iyo 2 ee waraaqda oo bogga 3 ka tag isaga oo bannaan. Waa inad waraaqdan ku hor saxeexdid Nootaayo Dadweyne. Waxa ad qof Nootaayo ah ka heli kartaa bangi, xafiis adeegyo sharci, xafiiska magaaladaada, ama xafiiska karaaniga maxkamadda.

**<u>Caddeyn Taageero Ilmo</u>**

"Madaxa waraaqda" u buuxi isla sidii ad u buuxisay waraaqda **Soo-jeedinta**. Inta ka hadhsan waraaqda buuxi adiga oo adeegsanayaa ogaanshahaaga ugu fiican. U fiirso inad qortid **dakhliga la shaqeystay ee sannadkii hore** iyo **dakhliga la filayo in la shaqeysto sannadkan** adiga oo gooni ugu kala hoos qoraya #1. Sidoo kale u fiirso inad **dakhli kale** gooni ugu qortid hoosta #2 iyo inad **anfacyada dheeraadka ah** ku hoos qortid #3. Waxad u baahan kartaa inad ka fiirisid diiwaanadaada, haddii ad haysatid, si ad u heshid macluumaad dhaqaale. Waa inad waraaqdan ku hor saxeexdid Nootaayo Dadweyne.

Kadib marka qofka kale helo **Soo-jeedintaada**, waxay Maxkamaddu weydiin doontaa isaga/iyada inu buuxiyo isla waraaqdaas dhaqaale oo kuu soo diro koobi.

### WARAAQDA BANDHIGGA LAMBARKA SUGIDDA BULSHADA WARAAQDA BANDHIGGA

Sharciga Gobolka iyo Federalku waxay kaa rabaan inad bixisid lambarkaaga sugidda bulshada iyo kuwa carruurtaada. Macluumaadkan waxa lagu ururiyaa waraaqda Bandhigga Lambarka Sugidda Bulshada, taasoo la galin doono gal qarsoodi leh oo ku jira galka maxkamadda.

### TALLAABADA LABAAAD: Gacanta ka Saar Waraaqaha

Hadda waa inad koobiyo siisid dhinaca kale. Waxa tan la yidhaahdaa "gacan ka saarista" waraaqaha maxkamadda. Xeerarka Maxkamaddu waxay leeyihiin waxad tan u sameyn karaa mid ka mid ah saddex siyaabood. Waxad ku diri kartaa boostada, adiga oo qofka ad is qabtaan weydiisanaya inu oggolaado "gacan ka saarista." Ama waxad koobiyada ku diri kartaa boostada la xaqiijiyay (certified mail). Waxad lacag siin kartaa sheriff-ka si u dhinaca kale u siiyo koobiyada.

**<u>Gacan ka Saaris ah Boostada Caadiga ah</u>**

Boostada ugu dir ama gacanta ka sii waraaqahan qofka kale:

- Koobi ah **Soo-jeedin Wax ka Beddelid**
- Koobi ah **Caddeyn Taageero Ilmo**
- Laba koobi oo ah **Qirasho Helitaan** (kadib marka ad madaxa waraaqda u buuxisay labada koobi)
- Gal leh shaambad iyo adreeska laguugu soo celinayo.

**Qirashada Helitaanku** waxay qofka kale weydiisanaysaa inu saxeexo, si loo muujiyo inu helay ama heshay waraaqaha, iyo in waraaqda qirashada ee la saxeexay laguu soo celiyo gudaha 20 maalmood.

Haddii ad waraaqda **Qirashada** dib u heshid gudaha 20 maalmood, tag Tallaabada 3. Haddi aanad helin, kadib markaas waxad u baahan

doontaa inad waraaqaha gacanta uga saartid hab kale.

**<u>Gacan ka Saaris ah Boostada la Xaqiiqiyay (Certified Mail)</u>**
Waraaqahan u qaado xafiiska boostada adiga oo wata gal:

- Koobi ah Soo-jeedin Wax ka Beddelid
- Koobi ah Caddeynta Taageero Ilmo

U sheeg karaaniga boostada inad rabtid inad waraaqaha ku dirtid boostada xaqiiqsan. U hubso inad weydiisatid "**Soo-celin Helitaan**" (Return Receipt) iyo "**U-geyn Xaddeysan**" (Restricted Delivery). Tan waxa kaaga baxaya kharash dheeraad ah waxana ku jira dhawr tallaabo oo dheeraad ah. Waaraaqo la buuxinayo iyo gargaar ka raadso xafiiskaaga boostada. Kaadhka cagaaran ee ad ka heshid boostada ka xereyso karaaniga maxkamadda si ad u cadeysid in waraaqaha la helay oo dhinaca kale helay.

**<u>Gacan ka Saaris la Adeegsanayo Sheriff-ka</u>**
Boostada ugu dir ama gee xafiiska sheriff-ka ee degmadaada:

- Asalka iyo hal koobi oo ah Soo-jeedin Wax ka Beddelid
- Koobi ah Caddeynta Taageerada Ilmaha

Waraaq u dir, ama qof ahaan ugu tag, oo weydiiso xafiiska sheriff-ka in waraaqaha gacanta laga saaro dhinac kale. Bixi adreeska guriga ee qofka kale. Haddii ad u maleynaysid inay dhib noqon doonto in qofka kale laga helo guriga, bixi adreeska shaqada ee qofka kale. Ku-xigeenka sheriff-ka ee waraaqaha "gacanta ka saaraya' qofka kale ayaa buuxin doona bogga 3 ee **Soo-jeedinta** oo asalka kuu soo celin doona.

**TALLAABADA SADDEXAAD: Xereyso Waraaqaha**

Buuxi Xaashida Koobitaanka ee Arrinta Qoyska ee Qarsoodi ah, kaasoo leh fariimo u gaar ah. Karaanigu ma aqbali doono waraaqaha ad xereysanaysid xaashidan la'aanteed.

Gacanta uga gee ama boostada ugu dir karaaniga maxkamadda waraaqahan oo asal ah:

- ☐ **Xaashida Koobitaanka**
- ☐ **Soo-jeedin Wax ka Beddelid** (oo leh saxeexa ku-xigeenka sheriff-ka haddii ad isticmaashay xafiiska sheriff-ka)
- ☐ **Qirasho Helitaan** (Haddii ad isticmaashay gacan ka saaris ah boostada caadiga ah)
- ☐ **Kaadhka Cagaaran** (haddii ad isticmaashay boostada xaqiiqsan)
- ☐ **Caddeyn Taageero Ilmo**

Haddii ad weydiisanaysid isbeddel ah taageero ilmo oo **kaliya**, ma jiro kharash ah xereynta. Haddii kale, Maxkamaddu waxay qaadaa lacag ama ujro si loo xereeyo waraaqahaaga. Haddii aanad iska bixin karin lacagta maxkamaddu qaado, waxad karaaniga weydiisan kartaa waraaqaha la yidhaahdo Codsi in la Galo Hawsha Iyada oo Aan la Bixin Lacag iyo Caddeyn. Buuxi waraaqahaas oo ku hor saxeex Nootaayo Dadweyne. Kadibna waraaqaha ka xereyso karaaniga. Garsoore ayaa fiirin doonaa macluumaadkaaga dhaqaale oo go'aamin doona inu kuu bannaan yahay "ka dhaafid lacag." Haddii ka dhaafidda la diido, waa inad lacagta ku bixisid gudaha 7 maalmood. Haddii ka dhaafidda laguu oggolaado, lagaama rabo inad bixisid qayb ama dhammaan kharashyada maxkamadda.

**TALLABADA AFRAAD: Shirka Maamulista Kiiska**

Waa in adiga iyo qofka kale tagtaan shir maamulis kiis oo lagu qabanayo maxkamadda. Gudaha laba todobaad kadib marka ad dhammeystirtay dhammaan tallaabooyinka sare, waxay Maxkamaddu ku ogeysiin doontaa taariikhda iyo wakhtiga shirka. Akhri dhammaan waraaqaha ad ka heshid Maxkamadda, oo ay ku jiraan mid magaceedu yahay: Muhiim "Macluumaad ku Saabsan Maamulista Kiiska".

**ADEEGYO GARGAAR LEH**

**<u>Fiidiyow</u>:** Maxkamaddu waxay leedahay fiidiyow sharaxaya habka maxkamadda ee wax looga beddelo ama loo fuliyo xukun.

**<u>Dhexdhexaadin:</u>** Waxa laga yaabaa in dhexdhexaadiye awoodo inu adiga iyo qofka kale ka caawiyo inad gaadhaan heshiis ku saabsan arrimaha la xidhiidha kiiskaaga. Maxkamaddu waxay leedahay fiidiyow sharaxaya waxa dhexdhexaadintu tahay. Dhexdhexaadinta waxa soo diyaarin kara maxkamadda ama dhexdhexaadiye gaar ah.

**<u>Waxbarasho waalid:</u>** Barnaamij waxbarasho waalid oo si gaar ah loogu qorsheeyay waalidka is furaya ama kala guuraya ayaa laga yaabaa inay idinka caawiso inad diiradda saartaan baahiyaha carruurtiina.

**Shaxanka Taageero Ilmo:** Tilmaamahan, sharci ahaan, waxa soo saartay DHHS waxana loo isticmaalaa inay gargaar ka geystaan in la go'aamiyo waajibaadka taageero ilmo marka la fiiriyo dakhliga. Shaxanka waxa laga heli karaa internetka barta ah: http://www.courts.maine.gov/fees_forms/forms/index.shtml ama waxa laga heli xafiiska karaaniga Maxkamadda Degmada.

Si ad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadan, la hadal karaaniga maxkamadda.